

Sharciga Amaanka Shaqada ee Maine



Boorkaan waxaa loogu talagalay in loogu sheego shaqsyaadka xaquuqdooda ku aadan soo gudbinta sheegashooyinka gunnada shaqo la'aanta. Ma lahan awooda fulinta ama saamaynta sharciga. Si aad u hesho xog dheeraad ah, wac 1-800-593-7660 laynka bilaashka ah.



Xeerarka Hagaaya Maamulka Sharciga Amaanka Shaqada ayaa sheegaaya in loo shaqeeye kasta ay tahay inuu goobtiisa ku dhajiyo uuna ku hayo ogaysiisyada noocaas ah ee ku socda shaqaalaha.

Boorkaan ayaa looga heli karaa barta oonleenka ah si bilaash ah waxaana laga samaysan karaa nuql: <https://www.main.gov/labor/posters/>

Shaqaalaha Waqtiga Buuxa iyo Nus Waqtiga

Sida loo gudbiyo Sheegashada gunnooyinka shaqo la'aanta

Dhammaan sheegashooyinka cusub iyo kuwa dib u furida ah ee gunnooyinka shaqo la'aanta waxaa lagu gudbiyaa midkood qaab oonleen ah, taleefanka ama boosto ah.

Dib ha u dhigint gudbinta codsigaaga marka aad shaqo la'aan noqoto. Sheegashooyinka dib looma celin karo taariikhdooda.

Marka aad gudbinayso, waa inaad taqaanaa Lambarkaaga Amniga Bulshada (Social Security).

Sidoo kale, waa inaad haysaa magacyada iyo ciwaannada dhammaan loo shaqeeyaasha aad u shaqaysay, iyo taariikhaha aad shaqada gashay 18 billood ee lasoo dhaafay.

Si aad oonleen uga codsato gal:

www.main.gov/reemployment

Qaabkaan ayaa ah kan ugu dhakhsaha badan, uguna fudud ee loo codsado.

Si aad ugu codsato khadka taleefanka:

1-800-593-7660 Iisticmaalayaasha

TTY ha wacaan Maine Relay 711.

Dhammaan shaqsyaadka gudbinaaya codsiga gunnooyinka Caymiska Shaqo la'aanta ayuu sharcigu ka doonayaa inay iska diiwaan gashaan aalada Maine JobLink. Booqo

www.mainecareercenter.gov si aad u gasho Maine JobLink.

Waxaan bixinnaa adeegyada turjumaanka luuqada oo ku baxa in ka badan 140 luuqdood oo looga hadlo gobalka.

Diyaar garoow ayaa la sameeyaa si loo helo turjumaan ku caawinaaya markaad wacdo Xarunta Sheegashooyinka Shaqo La'aanta.

Si aad ugu codsato boostada: Mararka qaar, loo shaqeeyahaaga ayaa ku siinaaya foomka codsiga.

Boostada ugu dir foomka hore ee codsiga Xarunta Sheegashooyinka Shaqo la'aanta ee hoos ku qoran.

Laanta Magdhawga Shaqo La'aanta ee Waaxda Shaqaalaha ee Maine

97 State House Station, Augusta, ME 04333-0097

Shuruudaha aasaasiga ah ee U qalmida Mushaaraadka inta lagu jiro mudada aasaasiga ah: "Muddada aasaasiga ah" waa muddo hal sano ah oo ay ku jiraan afarta rubuc ee sanadka.

Si uu codsi u gudbiyo, qofku waa inuu qaata labo jibaar celceliska sanadkii ee mushaarka asbuuclaha ah ee Maine labo rubuc oo kaladuwan oo sanadka kamid ah, iyo wadarta guud oo ah lix jibaar sanadkii, celcelis ahaan, mushaarka asbuucii ee Maine dhammaan mudada aasaaska ah. Inta badan, Waaxda Shaqaalaha ayaa diiwaanka ku haya xogta mushaarkaaga. Haddii aysan ku jirin diiwaanka, Waaxda ayaa qaadi doonta tallaabooyin ay kusoo helsayo.

Shaqo ka tagid: Haddii shaqadaadii ugu danbaysay lagaaga cayriyay shaqo la'aan awgeed, looma baahna baaritaan dheeraad ah. Haddii shaqadaadii ugu danbaysay aad uga tagtay sababo aan ahayn shaqo la'aan, waxaa lagu marsiin doonaa waraysi xaqiiqo raadin ah. Kadibna go'an ayaa laga gaari doonaa u qalmidaada gunnooyinka.

Shuruudaha Asbuuc kasta: Shuruudaha U qalmida ee asbuuclaha ah waxaa ku jira inaad awoodi karto inaad shaqayso aadna diyaar u tahay shaqo, inaad si joogto ah u raadio shaqo (illaa inaad shardiga shaqo raadinta "lagaa dhaafay" maahee), inaadan diidin shaqooyinka kugu haboon ee laguu yabooo ama soo jeedinta fursadaha shaqada kugu haboon ee aad ka hesho CareerCenters.

Qaxootiyaasha: Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah, Lambarkaaga Social Security iyo/ama lambarka Ogolaanshaha ee Soo galootiga ayay hubin doonaan adeegyada Socdaalka iyo Muwaadiniinta Maraykanka.

Gunnooyinka shaqo la'aanta waxaa laga qaadi karaa canshur: Gunnooyinka shaqo la'aanta ayaa la saari karaa canshur waana in lasoo sheegaa marka ad gudbinayso foomamkaaga canshur celinta dakhliga.

Taageerada ilmaha: Haddii lagugu leeyahay qarashka taageerada ilmaha oo aad siiso Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha (DHHS), wadar dhan konton boqolkiiba (50%) lacagta aad ku hesho shaqo la'aanta ayaa lagaa reebi doonaa loona diri doonaa DHHS.

Gunnooyinka shaqo la'aanta qaybta ah: Loo shaqeeye waa inuu soo diraa foomka codsiga shaqo la'aanta nuska ah ee shqaale kasta oo caadiyan shaqeeya waqtii buuxa lana siiyay saacado ka yar kuwa waqtiga buuxa intii lagu jiray asbuuca sabab la xariirta inaan shaqo jirin, kaasoo aan laga saarin shaqada loo shaqeeyahaas.